



Jilayaasha aan Dowliga Ahayn ee Soomaaliyeed

Somalia Non State Actors (SONSA)

Somalia Non State Actors www.sonsaplatform.com info@sonsaplatform.org +252612870023

06 October, 2019

WAR MURTIYEED

Kulamoo kala duwan oo ay isugu yimaadeen qeybaha kala duwan ee ururada bulshada rayidka, Xisbiyada siyaasadeed ee dalka iyo Guddiga madaxbanaan ee Doorashooyinka Qaranka, shirkaas oo loogu doodaayey hanaanka doorashooyinka dalka wajahaayo ee 2020/21 iyo sharciga doorashooyinka oo ay wasaarada Arrimaha guddaha, Federalka iyo Dib-Uhishiinta Dowladda Federalka hor geysay golaha wasiirada goluhuna ansixiyey.

Kulanaka ayaa diirada lagu saarayey aragtida ururada bulshadda rayidka ee sharciga doorashooyinka la filaayo in dalka ka dhacdo 2020/21 oo ay ugu muhiimsan yihiin, sharciga doorashooyinka, nidaamka doorashada uu dalka qaadanayo, qabyo qoraalka dastuurka, hubinta qoondada haweenka iyo helitaanka jawi xasiloon oo ogalaanayo in doorasho xur iyo xalaal ah ay ka dhacdo dalka.

Dood dheer iyo wadatshi loo dhanyahay kadib, kasoo qeyb-galayaasha kulanka ayaa soo bandhigay talo soo jeedin muhiim u ah in la qabto doorasho loo dhanyahay oo aan dalka kusoo kordhin dhibaatooyin hor leh, waxayna yihiin talooyinkan:-

- In doorashada 2020/21 ay ku qabsoonto waqtigii loo asteeyay oo marnaba aysan dhicin in dib loo dhigo.
- In la qabto kulan wadatashi ah kaas oo ay hogaamineyso dowlada federalka lagana qayb gelinaayo maamul gobaleedyada, xisbiyada siyaasada iyo ururada bulshadda rayidka, kulankaas oo looga doodi doono nidaamka doorashooyinka soo socda isla markaasna laga soo saarayo go'aan loo dhan yahay ee hab raaca doorashooyinka 2020/21.
- In guddiga madaxa bannaan ee doorashooyinka qaranka aan lagu faragalin awoodaha iyo howlaha uu siiyay dastuurka kumeel gaarka ah ee Soomaaliya
- In qodobada ka hor imaanaya dastuurka ee kujira sharciga doorashooyinka laga saaro.
- In xisbiyada siyaasadeed ee Dalka ay hubiyaan isku dheelitirnaanta mushraxiinta iyo xubnaha uga qayb galaya doorashooyinka la filayo in ay dhacaan.
- In maxkamada dastuuriga ah iyo guddiga adeega garsoorka sida ugu dhaqsiiyaha badan loo taabo galiyo.
- In hoos loo dhigo qarashka musharaxiinta xisbiyada ee u tartamaya xildhibaanimada.
- In hogaanka dowlada federaalka ay go'aan cad ka gaaraan nidaamka doorashada 2020/21, iyadoo lala tashanayo xisbiyada siyaasada, maamul gobaleedyada iyo ururada bulshada rayidka.

- Si loo helo nidaam doorasho oo loo dhanyahay, waa in dowlada federaalka iyo maamul gobaleedyada ay la imaadaan hannaan siyaasadeed oo is ogol iyo wadatashi ku dhisan.
- In kuraasta loo qoondeeyay haweenka, ay u tartami karaan haween oo kaliya.
- Haweenka waa in ay kamid noqdaan dhammaan hay'adaha guud ee qaranka si wax ku ool ah, gaar ahaan jagooyinka la isku doorto iyo kuwa la isku magacaabo ee sedexda awoodood ee dowlada iyo guddiyada madax bannaan ee qaranka, jinsina waa in uusan kabadan 70% , kana yaraan 30%.



Dhamaad